

La aqrinta Canugaaga

0-12 bilood



Bookstart
BookTrust



booktrust.org.uk

 **BookTrust**
Inspire a love of reading

**Marnaba lagama soo
hormarin si aad u
bilowdid ku raaxeysiga
buuggaagta oo
wadajir ah.**

**U aqrinta canugaaga ee da'da
hore waxay ku caawisaa inay siiso
bilowga suurtoogalka ah ee ugu
wanaagsan nolosha.**

Nabadeey hooyooyin, aabayaal iyo daryeelayaasha!

Waxaan aaminsannahay in la aqrinta canugaaga ay tahay mid ka mid ah qaababka ugu wanaagsan oo loogu caawinayo inay ugu diyaar garoobaan dugsiiga.

Buug yarahaan wuxuu ku siinayaa qaar ka mid ah tallooyinkeena ugu wanaagsan ee la aqrinta canugaaga - noogu soo biir onleenka sidoo kale, oo ogow wax badan soo jiidashada wadaagista sheekooyin, buuggaagta iyo laxanyada.



www.bookstart.org.uk/have-some-fun

Tallooyinka kugu caawineyso inaad ku raaxeysatid buuggaagtaada maalin walba

- ★ Dooro meel ka baxsan qeylo, talefeshinka iyo mobeelada.
- ★ Waqtiga hadalka oo la eegayo oo ka hadal sawirada.
- ★ Dhibaato malahan haddii canugaaga calaaliyo buuggaagta si uu u bilaabo. Mar dhow way ku raaxeysanayaan inay kugu caawiyaan inay bogga gidiyaan!





Isticmal dhawaqyada xayawaanka ama saameynada dhawaaqa - kuwaan waxay ku caawiyaan inay soo nooleeyaan sheekada oo labadiinaba idinka qosolsiiyo!



Sheekooyinka iyo heesaha waxaa lala wadaagi karaa qoyska oo dhan marka maxaan loo casumin walaalaha ama xubnaha kale ee qoyska si aad ugu soo biirtid?



Dhibaato malahan haddii aadan aheyn aqriye cajiib ah nafsadaada sababtoo ah dhageysiga kaliya ee codkaaga canugaaga ayuu raaxo gelinayaa.





Ku baashaal la heesida canugaaga:



*iftiin, iftiin, xidiga yar,
Sida aan layaabo!
Kor ka sareeyo
Sida dhaymonka!
iftiin, iftiin, xidiga yar,
Sida aan ula yaabo!*

*Twinkle, twinkle, little star,
How I wonder what you are!
Up above the world so high,
Like a diamond in the sky!
Twinkle, twinkle, little star,
How I wonder what you are!*





- ★ **Iftiin, Iftiinka waa laxan u wanaagsan waqtiga jifka - maxaadan uwada eegin kor cirka habeenkii.**
- ★ **Kuwada sameeya xidigo gacmahaaga - fur iyo xir gacmahaaga si aad u tustid xidiga oo iftiimayo.**
- ★ **La wadaagida heesaha maalin walba, xittaa dhoor daqiiqo, waxay sidoo kale ku caawin kartaa canugaaga inuu u koro aqriye.**

Maxaa la aqrinta canugaaga ay muhiim u tahay



Wada aqrinta waxay u wanaaagsantahay in lala kulmo oo lala dhiso xiriir jaceyl oo xoogan canugaaga.



Jadwalka wadaagida sheekooyinka iyo heesaha waxay ku caawineysaa canugaaga inuu u xiriiro oo u taageero faydada qabkooda.



Carruurta ku aqrisaa da'da hore waxay si wanaagsan ku sameeyaan marka ay galaan waxbarashada dugsiga heesaha iyo sheekooyinka wadajirka ah waxay siisaa bilow duulayo oo nollosha ah!



Raadinayo wax badan?

- ★ Booqo maktabaadada deegaanka halkaas oo aad ka deynsan kartid buuggaagta oo bilaash ah. Fiiri haddii ay maamuleen kulanka Waqtiga heesta ama Waqtiga sheekada halkaas oo aad kula kulmi kartid qoysaska kale oo aad kuwada raaxeysataan kulamada!
- ★ Weydii martigaaga caafimaadka afkaaraha ee sida aad u taageeri kartid hormarinta canugaaga idinka oo wada wadaagayo buuggaagta.
- ★ Ka hel buuggaag wanaagsan onleenka oo ay la jiraan Book Trust! Waxaan haynaa afkaaro badan sida buuggaagta ay ugu raaxeystaan websaydkaaga oo ay ku jiraan ciyaaraha iyo buugaagta sheekada onleenka.



Doorashada Buuggaagta

Book Trust wuxuu qaadaa buuggaagtaa kiciya qiyaasaha oo waa madadaalo.



Nagu soo biir onleenka si aad uga heshid tallooyinka buuggaag cajiib oo buuxo!

www.bookstart.org.uk/books



Ku baashaal buuggaag raadinta aad la wadaageysid websaydkeena oo aad ku raaxeysatid aqrinta buuggaagta ee baakida Bookstart. Way wanaagsantahay in la aqriyo isla buugga markale iyo markale sababtoo ah buuggaagta aad garaneyso way raaxo leeyihiin oo waxay dhisaan kalsooni.

Halkaan waa tusaalaha buugaagta wanaagsan ee aad ka ogaan kartid Helaha Buugga Bookstart!



Elmer's Friends

- “ Wiilkeyga oo 10 isbuuc jir ah wuu jacelyahay sheekadaan. Waxaan ku bilaabay inaan u aqriyo marka uu ahaa 5 isbuuc jir, marwalba oo aan aqrino wuu dhoola cadeeyaa! Wuu jacelyahay midaba iftiinka ah iyo dhawaqyada xayawaanka halka aniga iyo ninkeyga aan ka aqrino buugga. ”

Wada aqriya maa;lin walba oo sii canugaaga jaceyl nolol dheer ee buuggaagta iyo aqrinta.



Booqo booktrust.org.uk si aad wax badan uga ogaatid soo jiidashada wadaagida sheekooyinka, buuggaagta iyo heesaha canugaaga.

Aqrin farxad leh!

Book Trust waa samafal ka shaqeyo inay ku badesho nololaha dhinaca dhiirrogelinta jaceylka aqrinta. Waan ognahay in aqrinta raaxada ah ay ku caawiso carruurta inay wanaag ku sameeyaan dugsiga oo kordhiyaan faydada qabkooda, marka waxaan sameynaa wax walba oo aan awoodno ee aan ku caawino hubinta in canug walba uu ku raaxeyn karo sheekooyinka iyo buuggaagta.

Waxaan rajeyneynaa in aqrinta ay ka qeyb noqoneysa jadwalkaaga joogtada ah ee ah in qoyska oo dhan horay u eego..

Samafalka lambarka 313343

booktrust.org.uk

 **BookTrust**
Inspire a love of reading